


Talooyin loogu talagalay Qoysaska: Shirarka Waalidka iyo Macallimiinta




Marka ay qoysasku iyo macalimiinta ilmahooda is-kaashadaan, carruurta inta badan aad bay u guulaystaan. Weydii su'aalahan Shirarka Waalidka iyo Macallinka si aad gacan uga geysato dhisidda iskaashigaas. Waqtigu waa xaddidan yahay, markaa soo qaado 2-3 su'aalood oo adiga kuugu muhiimsan.

- Sidee buu ilmahaygu wax u bartaa? Waa maxay waxyaabaha uu ilmahaygu ku fiican yahay?
- Ilmahaygu miyuu gaadhay heerkii laga filayey hadda? (*Weydii imtixaanada iyo buundooyinka qiimaynta.*)
- Ma jiraan meelo uu ilmahaygu ku dhibtoonayo?
- Ma jiraan waxyaabo laga filayo ka qaybqaadashada fasalka? Ilmahaygu ma qaban karaan?
- Ma jiraan siyaabo aan guriga uga caawin karno waxbarashada?
- Waa maxay habka iyo wakhtiga ugu fiican ee lagula xidhiidhi karo?

Macluumaad dheeri ah oo aad kala hadli karto macalimiinta:

- Isticmaalka tignoolajiyada si ay ilmahaaga u qabsadaan shaqadooda dugsiga
- Xirfado uu ilmahaagu baran karo inta lagu jiro fasaxa dugsiga
- Barnaamijyada beesha jaaliyadda si ay u taageeraan waxbarashada, oo ay ku jiraan: barnaamijyada dugsiga ka dib, meelaha ilmaha wax lagu baro fasax dugsiiyeedka, ama waxbarasho shaqsiyeed (tutoring) iyo barnaamijyo dadka ilmaha la talayiya (mentoring)

Tips for Families: Parent-Teacher Conferences



When families partner with their child's teachers, children are often more successful. Ask these questions at Parent-Teacher Conferences to help build that partnership. Time is limited, so pick 2-3 questions that are most important to you.

- How does my child learn? What are my child's strengths?
- Is my child meeting current grade level expectations? (*Ask about test & assessment scores.*)
- Are there areas where my child is struggling?
- Are there expectations for classroom participation? Is my child meeting them?
- Are there ways we can help at home with learning?
- What is the best way and time to communicate with you?

Additional topics you can discuss with the teacher:

- Your child's use of technology to do their schoolwork
- Skills that your child can work on during the summer
- Community programs to support learning, including: afterschool programs, summer camp, or tutoring and mentoring programs